

# Wehelka Safarka TICO ee Dhammaan- Is-Wata

## Waad fiicantahay inaad tagto.

Markaad safarkaaga ka ballansato wakaaladaha socdaalka ee ka diiwaan gashan Tico ama mareegaha internetka ee TICO, waxaad si toos ah ugu dareysaa ilaalinta macaamiisha ee maalgashigaaga socdaalka. Wayna fududahay sababtoo ah dhammaan wakaaladaha socdaalka iyo mareegaha ka shaqeeya Ontaariyo waa in la diwaan geliyo. Waa sharciga.

TICO waa ilaalinta macaamiisheeda safarkaaga – waa xasiloonda maskaxda ee qof kasta oo ku ballansada safarkooda wakaaladda socdaalka ee TICO ka diiwaangashan ama mareegaha.

Meel kasta oo aad u safarto, marka aad ka iibsanayso safarka wakaaladda socdaalka ee TICO ka diiwaangashan ama mareegaha, waxaad ku qanacsanaan doontaa ogaanshaha TICO inay u diyaar tahay inay ku caawiso.

Maclumaad dheeraad ah oo ku saabsan ilaalinta macaamiisha, talooyinka safarka ama sida TICO ay u caawin karto, booqo

[www.tico.ca](http://www.tico.ca)



55 Standish Court, Suite 460  
Mississauga, ON L5R 4B2  
Tel: (905) 624-6241  
Fax: (905) 624-8631  
Toll: 1-888-451-TICO (8426)  
Email: [tico@tico.ca](mailto:tico@tico.ca)



## XEERKA

TICO waxay maamushaa shirkadaha safarka ee Ontaariyo

Dhammaan wakaaladaha socdaalka, mareegaha internetka iyo hawl-wadeenada dalxiiska ee Ontaariyo waa inay ka diiwaan gashan yihiin TICO oo ay raacaan sharciga.

Macmiil ahaan, waxaad xaq u leedahay:

- Xayeysiis run ah iyo dhammaan qimayaasha oo iswata
- Bixinta maclummaadka muhiimka ah iyo qaansheegta saxda ah
- Niyad deggan oo aad maskaxda ku hayso in aad ogaato in aad ballan ka qabsanayso ganacsi sharci ah

## HUBINTA

TICO waxay hubisaa oo ay kormeertaa wakaaladaha socdaalka ee Ontaariyo iyo mareegaha internetka.

TICO waxay hubisaa in wakaaladaha socdaalka ee Ontaariyo, mareegaha internetka iyo hawl wadeenada dalxiisku ay raacaan sharciyada ilaalinta macaamiisha ee adag, oo ay edbiyaan kuwa aan raacin shuruucda.

## LACAG CELINTA

TICO waxay soo celinaysaa lacagtii adeegyada aad lacagta ku bixisay laakiin aadan helin.

Haddii aad ka iibsatid adeegyada safarka wakaaladaha socdaalka ee ka diiwaan gashan TICO ama mareegaha, oo aanad helin adeegyadaas iyaga oo albaabada loo xiray ama barakacay darteed, TICO ayaa ku caawin karta.

- Waxay damaanad qaadeysa wakaaladaha socdaalka ee Ontario, mareegaha internetka iyo hawl-wadeennada dalxiiska
- Waxay damaanad qaadeysaa diyaarad kasta iyo khad kasta oo safar ah
- Waxay soo celisaa lacag gaaraysa \$5,000 qofkiiba
- Mararka qaarkood, TICO waxay keenaysaa gurigooda rakaab go'doonsan.

## CABASHOOYINKA

TICO way ku caawineysaa marka aad cabasho qabto.

Haddii aad cabasho qabto ka dib markaad ka ballansato socdaal wakaalad socdaal, website ama hawlwadeenka dalxiis, TICO waxay leedahay hab loo dacwoodo si ay kuu caawiso.

Waxaanu la xiriiri doonaa wakaaladaada socdaalka, mareegahaaga ama hawlwadeenka dalxiiska si aanu u aragno in sharciyada ilaalinta macaamiisha si sax ah loo raacay.

In kasta oo aanaan ku soo rogi karin heshiis Khasab ah ama aan u dhaqmin sidii garqaade ahaan, waxaanu hubinaynaa inaad heshay nidaam kaa caawinaya xallinta welwelkaaga.

## WAXBARASHO

TICO waxay maamushaa heirarka waxbarasho ee wakiilada socdaalka ee Ontario

Wakiil kasta oo socdaal oo ka shaqeeya hay'ad socdaal oo ka diiwaan gashan TICO ama mareegaha internetka waa, sharci ahaan, waa inay buuxiyaan heirka aqoonta ee ku saabsan waajibaadkooda markay iibinayaan safarka.